

QIIMEYNTA SHAQAALAHA

Gudiga waxbarashada waxay aqoonsan tahay in habka qiimaynta oo si wanaagsan loo horumaray iyo si adag loo maamulay ay furo u tahay sugida iyo ilaalinta shaqaale Degmo oo xoog iyo waxtar leh. Gudiga waxay u arkaan qiimaynta dhamaan shaqaalaha inay tahay qalab lagama maarmaan u ah hormarinta waxqabadka shaqsi ahaaneed iyo guud ahaan awooda Degmada si ay u buuxiso ujeedooyinkeeda waxbarasho si ay u hormariso kobcinta iyo hormarka ardayga.

Si taas loo gaaro, Kormeeraha Guud waa inoo qabtaa sanadkiiba qiimeyn xaqiijin dhamaan shaqaalaha sida joogtada ah u shaqeeyo, in natiijooyinka qiimeynta si wanaagsan loo diiwaangeliyo, iyo in maamulayaasha iyo kormeerayaasha si sax ah loogu tababaro inay sameeyaan qiimeyn. Habka iyo nidaamka loo isticmaalo in lagu qiimeeyo shaqaalaha waa in ay raacaan Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee lagu dabaqi karo, Sharciga Waxbarashada, Xeerarka Gudoomiyaha Waxbarashada, iyo heshiisyada gorgortanka wadareed Degmada.

Shaqaalaha laga dhaafo, kuwa aan hoos imanin heshiiska gorgortanka wadareedka, waa in la qiimeeyaa ugu dambayn August 1 deeda sanad dugsiiyeedka ka hor. Nidaamyada qiimaynta iyo qalabyada shaqaalaha laga dhaafo waa in aysan ka adkaanin kuwa loo isticmaalo shaqaalaha hada joogo. Dhamaan dukumeentiyada qiimeynta waa in lagu haayaa Xafiiska Raasamaalka iyo waa in ay heli karaan shaqaalaha. Qorshayaasha Dib u eegista Sanadlaha ah ee Waxqabadka Xirfadlaha Degmada ayaa lagu daabici doonaa websiteka Degmada.

Tixraac: Sharciga Waxbarashada NYS §3012-c
8 NYCRR §30-2
8 NYCRR §100.2(o)(1)

Xasuus qoraal: Siyaasadaan waxee bedeshay siyaasadii hore ee "Qiimaynta Shaqaalaha Waxbarashada" (0330), siyaasada "Qiimaynta Shaqaalaha Maamulka" (0335), iyo siyaasada "Qiimaynta Shaqaalaha Taageerada" (0340). La qaatay Sebteembar 26, 2013 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2013-14: 244; Wax laga bedelay Abriil 27, 2023 iyadoo la raacaayo Qaraarka No. 2022-23: 627

ct/sg

Abriil 27, 2023